

Ilmahaagu Diyaar Ma Yihiin?

Sharciga Talaalka ee Barnaamijka Daryeelka Carruurta iyo Waxbarashada Carruurnimada Hore

Carruurta ayaa laga doonayaa inay qaataan talaallada kahor inta aan laga diiwaan gelin daryeelka carruurta iyo waxbarashada carruurnimada hore ee Minnesota ama ay soo gudbiyaan shardi dhaaf. Shardigaan ayaa quseeya dhammaan xarumaha daryeelka Carruurta ee ruqsadda leh, daryeelka carruurta ee qoyska, daryeelka carruurta ee laga cafiyay ruqsada, iyo barnaamijyada waxbarashada carruurnimada hore sida dugsiga barbaarinta, diyaarinta dheeriga ah ee dugsiga, xarumaha baxnaannada ubadka ee ikhtiyaariga ah, iyo waxbarashada gaarka ah ee dhalaanka. Ka fiiri heerka da'da cunugaaga shaxda hoose oo eeg wadarta guud ee kuurooyinka talaal kasta ee laga rabo ilmaha da'diisa ah.

Talaallada Qasabka ah	3-4 bilood	5-6 bilood	7-15 bilood	16-23 bilood	24 bilood ilaa dugsiga barbaarinta
Cagaarshoowga B (Hep B)	2 Kuurooyin	2 Kuurooyin	3 Kuurooyin	3 Kuurooyin	3 Kuurooyin
Gowracadata, teetanada, iyo xiiqdheerta (DTaP)	1 Kuuro	2 Kuurooyin	3 Kuurooyin	3 Kuurooyin	4 Kuurooyin
Dabeysha (IPV)	1 Kuuro	2 Kuurooyin	2 Kuurooyin	2 Kuurooyin	3 Kuurooyin
Pneumococcal (PCV)	1 Kuuro	2 Kuurooyin	3 Kuurooyin	3 Kuurooyin	
Jeermiska hargabka nooca b (Hib)	1 Kuuro	1 Kuuro	1 Kuuro	1 Kuuro	1 Kuuro
Jadecada, qaamo qanshiirka, rubeelada (MMR)				1 Kuuro	1 Kuuro
Varicella (busbus)				1 Kuuro	1 Kuuro
Cagaarshoowga A (Hep A)					1 Kuuro

Ogoow: Tirada kuurooyinka ayaa kala duwanaan kara haddii cunugaagu ka dib dhaco jadwalka. Haddii cunugaagu ka dib dhaco talaalkiisa kama soo daahin inuu ka dabo tago wixii dhaafay, kala hadal dhakhtarkiisa.

Talaallada lagu talinaayo laakiin aan qasabka ku ahayn barnaamijyada daryeelka carruurta ama waxbarashada carruurnimada hore

Hargabka (durayga), COVID-19, fayraska ku dhaca neef mareenka (RSV), rotavirus iyo talaallada kale ayaa lagu talinayaa in ubadka la siiyo si loo xaqiijiyo inay helaan difaac buuxa. Kala hadal dhakhtarkaaga xiliga ay tahay in cunugaaga la siiyo talaallada lagu talinaayo. Wixii xog dheeri ah booqo [CDC: Jadwallada Talaalka ee Adiga iyo Qoyskaaga \(www.cdc.gov/vaccines/imz-schedules/index.html\)](https://www.cdc.gov/vaccines/imz-schedules/index.html).

Tilmaamaha waalidiinta iyo masuuliyiinta ilmaha

- Xaqiiji in ilmahaagu helo dhammaan talaallada loo baahan yahay kahor maalintooda koobaad ee daryeelka carruurta/ barnaamijka waxbarashada carruurnimada hore ama soo gudbi cadeynta shardi dhaafka.
- Soo gudbi nuqulka diiwaanka talaalka cunugaaga una dir barnaamijkiisa daryeelka carruurta, waxbarashada carruurnimada hore, ama dugsiga. Waxaad nuqulka diiwaankiisa ka helayaa rugta caafimaadka ama waxaad ka helayaa diiwaankiisa barta [Hel Diiwaankayga Talaalka \(www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/records.html\)](https://www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/records.html).
- Fadlan buuxi dhabarka danbe haddii cunugaagu u baahan yahay shardi dhaafka sababo caafimaad awgood ama haddii aad u diideyso sababo aan ahayn kuwo caafimaad oo la xiriira caqiidadaada gaarka ah.



[Talaallada Saqiirada, Carruurta, iyo Kurayda \(www.health.state.mn.us/people/immunize/basics/kids.html\)](https://www.health.state.mn.us/people/immunize/basics/kids.html)

Shardi dhaafyada caafimaad iyo kuwa aan qusayn caafimaadka

Tilmaamaha qorista shardi dhaafyada ee caafimaad ama aan ahayn kuwo caafimaad iyo taariikhda inuu horay kuugu dhacay xanuunka busbuska (Varicella)

Raac talaabooyinka 1 iyo 2 ee hoose si aad u qorto shardi dhaafka caafimaadka, ka baxsan caafimaadka, ama taariikhda inuu horay kuugu dhacay xanuunka busbuska.

- Ku qor X godka si aad u muujiso shardi dhaafka caafimaadka ama aan qusayn caafimaadka. Haddii aad cunugaaga ka reebayso wax ka badan hal talaal, ku calaamadi talaalka aad ka reebayso X.
- Soo qaado saxiixyada shardi dhaafyada ama taariikhda inuu horay kuugu dhacay xanuunka busbuska.

Talaallada Qasabka ah	Caafimaadka	Aan Qusayn Caafimaadka
Cagaarshoowga B (Hep B)		
Gowracadata, teetanada, iyo xiiqdheerta (DTaP)		
Dabeysaha (IPV)		
Pneumococcal (PCV)		
Jeermiska hargabka nooca b (Hib)		
Jadecada, qaamo qanshiirka, rubeelada (MMR)		
Varicella (Busbus)		
Cagaarshoowga A (Hep A)		

Shardi Dhaafka caafimaadka: Dhakhtarku waa inuu akhriyaa uuna saxiixaa shardi dhaafka caafimaadka. Dhakhtar waxaa ku jira bixiya caafimaadka ee ruqsada leh, kalkaaliso bixisa caafimaadka, ama kaaliya dhakhtarka.

Sida ku cad saxiixayga hoose, waxaan xaqiijinayaa in ilmahaan uusan qaadanayn talaallada lagu calaamadiyay X ee liiska ku jira sababo caafimaadka awgood (caqabado) ama sabab la xiriirta in baaritaan lagu ogaaday in uu horay u qaatay talaallada.

Saxiixa: _____
(dhakhtarka caafimaadka)

Taariikhda: _____

Shardi dhaafyada aan caafimaadka ahayn: Waalidka/masuulku waa inuu saxiixaa shardi dhaafyada aan caafimaadka ahayn foomkana waa in lagu saxiixaa laguna tiimbareeyaa nootaayada. Ilmaha ayaan laga doonayn inuu qaato talaal kasoo horjeeda caqiidada waalidkiis ama masuulkiisa. Xulashada in uusan qaadan talaalka ayaa khatar gelinaysa caafimaadka cunugaaga iyo dadka kale ee ku xeeran. Carruurta aan talaalka haysan kuwaasoo uu ku dhaco cudur looga hortagi karo talaalka ayaa laga dooni karaa inay guriga joogaan oo aysan dugsiga iyo hawlaha kale aadin muddo ilaa 21 maalmood ah si loo difaaco naftooda iyo dadka kale. Anoo saxiixaaya waxaan xaqiijinayaa in ilmahaan uusan heli doonin talaallada lagu asteeyay X ee ku jira liiska sabab la xiriirta diintayda iyo in aan fahmaayo in laga dooni karo inuu ka maqnaado dugsiga iyo hawlaha kale muddo ilaa 21 maalmood ah haddii uu ku dhaco cudur talaalka looga hortago.

Saxiixaa: _____ Taariikhda: _____
(waalidka/masuulka)

Shardi dhaafyada aan caafimaadka ahayn waa in sidoo kale lagu saxiixaa oo lagu tiimbareeyaa nootaayada:

Tiimbaraha Nootaayada

Dukumiintigaan hortayda ayaa lagu saxiixay markay ahayd

_____ (taariikhda),

waxaana saxiixay _____
(magaca waalidka ama masuulka)

Saxiixa Nootaayada:

Gobalka _____,

Wadanka _____

Taariikhda in uu horay kuugu dhacay xanuunka busbuska (Varicella): Haddii ilmaha uu horay ugu dhacay busbus, lagama doonaayo inuu qaato talaalka varicella. Dhakhtarku waa inuu saxiixaa foomkaan haddii cudurku ku dhacay kadib Sibteembar 1, 2010. Haddii ilmaha uu ku dhacay busbus kahor Sibteembar 1, 2010, waalidka ama masuulka ayaa saxiixi kara.

Saxiixayga hoose ayaa ka dhigan in aan xaqiijinaayo in ilmahaan uusan u baahnayn talaalka varicella sabab la xiriirta inuu ku dhacay busbus bishii iyo sanadkii _____

Saxiixa: _____ Taariikhda: _____

(dhakhtarka caafimaadka, wakiilka rugta caafimaadka dadwaynaha, ama waalidka/masuulka)